

[Somali]



# Saint Paul **BLAST OFF** TO KINDERGARTEN

## April

### Dugsiga Ha Laysu Diyaariyo

#### Layliska Xirfadaha Bishan

- Ilmahaaga ka caawi sida uu ku dooran lahaa iyo in uu labbisto dhar gudaha iyo dibaddaba oo xaaladaha hawada ka dhawra. Marka ayaga ay hesho fursadaha ay ku dooranayso dharkeeda waxa ay ku kordhinaysaa kalsoni, xasiilooni iyo garasho. Iska hubso in ilmahaaga ay taqaano jakadaheeda iyo bokiska ay cuntada ku ridato. Ku caawi asaga sida uu u gashan lahaa iyo iska siibi lahaa jaakadda iyo sida kabaha loo xirto.

#### Hawlaha

- Ilmahaaga weydii waxyaalaha dhan oo ay keligeed samaysan karto. Isla qora liistada waxyaalahaan. Ilmahaaga weydii in ay magacaawdo qaar kamid ah waxyaalaha ay rabto in ay iskeeda u samaysato iyo sida ay ku baranayso in ay waxyaalahaas ay samaysato.
- Ilmahaaga ku ammaan madaxbannaanidooda. Marka ay ilmahaaga iskeeda ay u laabisato ama kabaheeda iyo sokisyadeeda xirato, dadaalkaasi ku ammaan. Marka aad ku dhiirrigalisid dabeecadahaan ilmahaagana waxa ay isku dayi doonaan xirfado badan oo cusub isku dayi doonto.
- Waxa aad samaysaa qariidada sheegaysa xogta koormada ee ilmahaaga. Qariiradan u isticmaal xogta horumarka ay samaynayso iyo xirfadaha cusub oo ay soo baratay.
- Ka hadal waxa ku saabsan hawada sida ay tahay wakhtiyada kala duwan ee sanadka iyo nooca dharka ay dadka labbistaan xilliyada kala duwan. Diseembar ma tahay xilli uu kuleyl jiro? Caadi ahaan ma waxaa xirataa koot iyo gacan-gashiga xilliyada deyrta?
- Ilmahaaga la cayaar cayaarta "ha la labbisto". Isaga u daa in uu doorto labbiska uu xiranayo noocyada kala duwan ee hawada iyo kala hadal doorshoyinkiisa.
- Wardaq culus u samee 2 saf ama 3 ama 4 ee duleelo leh. Ilmahaaga waxaa gacanta ka saartaa dun, jeex maryo ah, iyo xargaha kabaha lagu xir xiro si ay ugu bara barato kaba xirashada.

**Books for Children** Buugag dheeraad waxa laga helaa shabakadda internetka [www.blastofftok.org](http://www.blastofftok.org)

- *Growing Like Me* ay qortay Anne Rockwell
- *Centipede's 100 Shoes* uu qoray Tony Ross
- *Hello, Shoes!* ay qortay Joan Blos
- *Ella Sarah Gets Dressed* ay qortay Margaret Chodos-Irvine

**Books for Parents** Buugag dheeraad waxa laga helaa shabakadda internetka [www.blastofftok.org](http://www.blastofftok.org)

- *The Giant Encyclopedia of Kindergarten Activities: Over 600 Activities Created by Teachers for Teachers* ay saxeen by Kathy Charner, Maureen Murphy, and Jennifer Ford
- *The Complete Book of Activities, Games, Stories, Props, Recipes, and Dances for Young Children* ay qoreen Pam Schiller iyo Jackie Silberg

### Dugsiga Ha Laysu Diyaariyo

#### Layliska Xirfadaha Bishaan

- Ilmahaaga meelo badan gey sida maktabadda, beeraha lagu nasto, dukaamada cuntada, boostada, masaajidka, guriga saxiibkaa. Waayoarignimada badan waxa ay siyaadinaysaa korriimada maskaxda ilmahaaga iyo in erayada ay meelkasta ku yaalaa. Erayada waxaa lagu bartaa marka la hadlayo iyo waayoaragnimada in aad kala hadlayso ilmahaaga waxa adduunka idinku wareegsan. Boqashda maktabadda waxa ay ilmahaaga ku caawinaysaa jacalyka buugagga, iyo ilmaha buugaaga jecelna waxa ay jecelyihiin in ay bartaan akhrisashada.

### Caafimaadka Ha La Qaado

#### Layliska Xirfadaha Bishan

- Ilmahaaga u kaxay dhakhtarka ilkaha marka uu billabayso dugsiga barbaarinta. Waa muhiim in caruurta ilkaha laga baaro si joogto ah.

**Faahfaahin dheeraad ah booqo shabakadda internetka [www.blastofftok.org](http://www.blastofftok.org)**